

# *Garo Xuquuqdaada*

## Sharciga Alberta ee Ka Hortagga Dagaalka Qoyska (PAFVA)

### Xaashida macluumaadka

Tiro koobyadu waxay muujinayaan in 22% dhammaan dembiyada qalafsan ee Canada ka dhacaa in ay sameeyaan dadka ka tirsan qoyska qofka wax loo geystay.[1]

## *Waa maxay dagaalka qoysku?*

Dagaalka qoysku waa ku xad gudubka awooda xidhiidhka qoyska, aaminaada ama isku haleynta dhax taala qoyska, khatarna gelin karta nolosha, badbaadinta iyo daryeelka qof kale. Dagaalka qoysku waxa uu saameyn kara affada (mid la qabo ama mid wehel sharci ah), darxumeynta iyo dayicidda qof qaan gaadh ah, darxumeynta iyo daayacidda ilmo, galmo darxumeynta ilmo, darxumeynta waalid iyo darxumeynta xubnaha kale ee qoyska.[2] Dagaalka Qoyska waxaa ka mid noqon kara qeyb ama dhammaan dhaqamada soo socda: dhibaatayn jidheed, darxumeyn caqli ah, dambi dhibaatayn/daba galid, gardarro joogta ah, afxumo, darxumeyn galmo, darxumeyn hanti iyo darxumeyn diini ah. Dadka wax ku noqda dagaalka qoyska waxa ka mid ah:labada wada socda, labada wada nool (kuwa is qaba ama wehel sharci kuwada nool), dadka ku wada nool xidhiidhka LGBTQ*, caruurta, dhalinta, dadka naafada ah ama dadka da'da weyn.

## *Keli ma tihid*

Hadaad ku sugantahay xidhiidh darxumo, waxaa muhiim ah in aad ogaatid in aanad keli ahayn oo aanad u qalmin in lagu darxumeeyo. Isla markaasna waa inaad ogaataa in caruurta ku sugan xidhiidh darxumo in ay la mid yihiin qofka darxumo ka soo gaadho dagaal qoys. Dagaalka qoysku waa dembi culus, adiga iyo caruurtaadu waxaad heli kartaan kaalmo la idinku daryeelo.

### Sida sharcigu kuu ilaalin karo

*Sharciga Alberta ee ka Hortagga Dagaal Qoys* waxa uu tan iyo 1999 daryeel u fidinayey dadka dhibaato ka soo gaadho dagaal qoys. Isbadel ayaa lagu sameeyey sharcigaas, laga bilaabo Noofambar 1, 2006 si daryeel fiican loogu geysto dadka lagu darxumeeyey dagaal qoys. Shargica *ka Hortagga Dagaal Qoys* waxa uu daryeelaa **dhamaan** xubnaha qoyska ee lagu darxumeeyey dagaal qoys. Hadda Sharcigaasu waxa uu isla markaas daryeelaa qaraabada, iyada aan loo eegin in qofka la darxumeeyey iyo darxumeeyuhu meel ku wada nool yihiin. Sharcigu waxa uu isla markaas daryeelayaa dadka uu xubin qoyska ka mid ahi ama wehel hore uu ku hayo daba gal.

* Dumarka ama ragga khaniisiinta ah, kuwa labeeka ah, kuwa isbedelay ama kuwa isu heysta in ay yihiin lab iyo dhadig, iyo kuwa qasan.



Government of Alberta



***Sharciga ka Hortagga Dagaal Qoys*** **waxa uu ka koobanyahay saddex qeybood oo badbaadin ah:**

**1. Go'aanka Badbaadinta Deg-dega ah (EPO)**

EPO waa habka sheegida nabadgelyeynta deg-dega ah ee qofka lagu darxumeeyey dagaal qoys. EPO waxa uu siiyaa ilaalin sharci ah dadka lagu darxumeeyey dagaal qoys mase aha eedeyn dambi. Habka EPO waxaa uu amri karaa darxumeeyaha in uu uusan iman meelaha uu qofka la darxumeeyey u badan yahay ama uusan xidhiidh la yeelan qofkaas. EPO waxay u ogolaan kartaa qofka la darxumeeyey in uu joogo guriga, darxumeeyahana uu guriga ka tago. EPO waxa kale ay sameyn kartaa in ay ilaalin deg-deg ah u fidiso qofka la darxumeeyey iyo xubna kale ee qoyska.

**Helitaanka EPO kugu ma joogto lacag.** Shaqaalaha deegyada Caruurta iyo Dhalinta iyo boolisku waxay dalban karaan EPO da 24ka saac ee maalintii, maalin walba ee todobaadka. Dadka la darxumeeyey EPO da waxay ka Dalban karaan maxkamadda gobolka waqtiyada maxkamaddu furan tahay. EPO da waa in ballan kale maxkamadda looga sameeyaa si dib loo gu eego Fadhiga Maxkamadda Queen muddo ku sugan sagaal beri si ay maxkamaddu dib ugu fiirsato macluumaadka ku saabsan Dalabka. Dib u fiirinta ka dib, Xaakinku wuxuu go'aan ku gaadhi doonaa haddiiba, loo baahdo bixitaan amar kale.

**2. Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen**

Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen waxaa uu sameeyaa arrimo la mid ah kuwa ku sugan EPO da. Halka EPO da ay ku saabsantahay badbaadinta deg-degga ah ee qofka la darxumeeyey, Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen waxa ay bixin karaa badbaado qorshaysan oo ku sugnaan karta muddo sannad ah. Shardiyaal kalena waa lagu dari karaaa Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen. Tusaale ahaan, Go'aanka Maxkamaddu waxa uu amri karaa darxumeeyaha in uu u celiyo magdhow lacageed qofka ku darxumooday dagaalka qoyska, , darxumeeyaha loogu diro khabiir kala taliya arrintaas, isla markaasna ilmaha darxumeynta wax ku noqday loogu diro khabiir arrimahas ku lug leh iyada aysan maxkamaddu kala tashan labada waalid ee ilmahaas. Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen waxa la bixin karaa marka dib loo fiiriyo Go'aanka Badbaadinta Deg-dega ah. Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen waxaa loo isticmaali karaa si toos ah (iyada aan lagu xidhin EPO da).

**3. Amarka Guri Gelista**

Amarka Guri Gelistu waxa uu sarkaal booliska u ogolanayaa in uu galo goobta ku xusan amar gelinta guri si uu sarkaalkaasi u baadho, gargaaro ama u baadho xubin ka tirsan qoyska, gurigana ka saaro qofka la darxumeeyay nabadgelyadooda awgeed ka dib marka uu xubintaas ka helo ogolaansho. Booliska keligii ayaa Amarka Guri GeliSta isticmaali kara.

## Halka laga helo warar faahfaahin ah

Helitaanka faahfaahinta ku saabsan *Sharciga ka Hortagga Dagaal Qoys* ama barashada ka hortagga dagaal qoys, wac telefoonka 24-saac ee Khadka Macluumaadka Dagaalka Qoyska (ee bilaashka ah) ee **310-1818,** ama booqo Adeegyada Caruurta iyo Dhalinta ee Alberta **www.familyviolence.alberta.ca**. Isla markaa waxaad ka heli kartaa Xafiis Goboleedka Gargaarka Sharciga, macluumaad ku saabsan sida loo helo EPO da ama Go'aanka Fadhiga Badbaadinta ee Maxkamadda Queen. Wac telefoonka bilaashka ah ee **310-0000,** codsana in laguu gudbiyo **(780) 427-7575**.

# Raadi Gargaar

**Haddii naftaadu ama qof aad garaneysu ku sugan yahay khatar deg deh ah, wac 911.** Gurmadka bulshadaada ku saabsan ama faahfaahim kale wac 24-saac ee Khadka Macluumaadka Dagaalka Qoyska ee **310-1818 ama booqo www.familyviolence.alberta.ca.** Adeegyada Caruurta iyo Dhalinyarada ee Alberta wax uu ku kalsoon yahay in uu horseed ka noqdo dadaalka Alberta ee ku saabsan Tirtiridda Dagaalka Qoyska iyo Xoog u Sheegashada.

[1] Ogrodnik, L. (Ed.). (Oktoobar 2008*). Dagaalka Qoyska ee Canada: Qoraal tiro koob 2008* (Buuga No.85-244-X). Ottawa, ON. Tiro Koobka Canada. Laga keenay http://www.statcan.gc.ca/pub/85-224-x/85-224-x2008000-eng.pdf

[2] Alberta: Hawlaha Caruurta iyo Dhalinta (2004). *Shirweynaha Alberta ee Dagaalka iyo Xoog-Maquuninta Qoyska:Wada raadinta xalal*. Edmonton, AB: Madbacadda Boqoradda. Laga soo gooriyey http://www.child.alberta.ca/home/documents/familyviolence/rpt_opfvb_finding_solutions_high.pdf



Government of Alberta